



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 14, 2021-ka

Ku socota: Daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Deeq lacageed oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood

Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa soo saartay codsiyada deeqda lacageed oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood iyada oo sababtu tahay dhibaatooyinka dhanka shaqaalaha ee xad-dhaafka ah. Fursadaha maalgelinta ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha ayaa la heli doonaa mustaqbalka.

Deeqda lacageed waa in loo isticmaalaa sii haysashada shaqada iyo shaqaaleysiinta shaqaalaha cusub ama kuwa hadda jira si ay guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood u furnaadaan oo u shaqeyaan. ODDS waxay daryeel bixiyayaasha uga baahan tahay in ay maalgelinta u isticmaalaan waxyaabaha ku jira liiska hawlaha ee ku lifaaqan. Hawlahani waxaa lagu soo saaray fikrado laga helay daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadka wax u dooda.

Tirada deeqda lacageed ee loogu talagalay hay'ad kasta waxaa lagu go'aamin doonaa tirada hay'adaha daryeelka bixiya ee ODDS ee u qalma ee codsada iyo celceliska tirada xirfadlayaasha taageerada tooska ah ee shaqeeya, oo ay ku jiraan shaqooyinka bannaan. ODDS waxay soo ururin doontaa macluumaadka iyada oo gudbinta macluumaadkani uu yahay shuruud looga baahan yahay heshiiska deeqda lacageed.

Si ay dalbadaan hay'adaha daryeelka bixiya ee qalmaa waa in ay buuxiyaan oo saxiixaan Qoraalka Isfahamka (MOU) oo ugu gudbiyaan [ODDS.Contracts@dhs.oregon.gov](mailto:ODDS.Contracts@dhs.oregon.gov) muddo aan ka dambeyn dhammaadka maalinta shaqo ee Sibtambar 20, 2021 iyada oo sababtu tahay qaabka maalgelinta, soo gudbinta lala soo daaho lama aqbali doono. Fadlan xaqiiji in aad geliso dhammaan macluumaadka la codsaday. Fadlan xaqiiji in aad sida ugu dhakhsaha badan u saxiixdo codsiga deeqdaada lacageed.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Afrika Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).